

5 HAB OO FUDUD OO

Aad u Taageeri Karto Caafimaadka Maskaxda Ilmahaaga

1 **Ka caawi ilmahaaga inuu ogaado inuu bulshada dugsiga ka tirsan yahay.**

- Markaad guriga joogtaan sida badan dugsiga kala hadal. U sheeg ilmahaaga waxaad aragto inuu baranayo oo uu higsanayo.
- Taageer kaqaybqaadashada ilmahaaga ee hawlaha manhajka ka baxsan

Waan ogahay in fasaladaadu ay adag yihiin sanadkan, laakiin waxaan ku faanayaa sidaad _____

2 **Taageer xiriirka ilmahaagu la leeyahay macallimiinta.**

- Waydii ilmahaaga macallimiinta ama dadka waawayn ee dugsiga jooga ee uu dareemo inay taageeraan.
- Hubi in macallinka ama la-taliyaha dugsigu ogyahay haddii ilmahaagu dareemo cidlo ama aan dugsiga lagu soo dhawayn.

Ayaad la hadli kartaa haddii ammuuruhu kugu adkaadaan dugsiga?

3 **Sameeya caadooyinka qoyska iyo dugsiga idinkoo wadajira.**

- Ku dhiirigali ilmahaaga inuu la wadaago saaxiibadii iyo macallimiinta dhaqanka ama caadooyinka qoyska ee muhiimka u ah qoyskaaga ama bulshada.
- Kala qaybqaado caadooyinka dugsiga ilmahaaga (Tusaale: Riwaayadaha aadista dugsiga).

Aynu u dabbaaldegnno si wadajira ah! Ka xasuusataa kalhore markii...

4 **Taageer habdhaqanada dhisaya guusha iyo fayo-qabka.**

- Kala hadal oo tusaale ugu noqo caadooyinka hurdada ee caafimaadka qaba (Tusaale: Hurdo xilli hore ah oo joogto ah).
- Dhiirigali hawlaha waafaqsan waxyaalaha ilmahaagu xiiseeyo ee dhisa xirfadaha xallinta mashaakilka (Tusaale: Isboortiga, yoogada, muusiga, tiyaatarka).

Maxaad u baahan tahay maanta si aad u gaarto yoolkaaga? Ma iiga baahan tahay wax caawimo ah?

5 **Sii wad inaad la samaysato xiriiro habitaan marka guriga aad joogtaan.**

- Isla maadaysta qoys ahaan idinkoo ciyaaraya geemam, cunto wada diyaarinaya, iwm.
- La samee wada-sheekaysi sahlan oo maalinle ah ilmahaaga oo ku saabsan dugsiga, saaxiibada, iyo waxyaalo kale.

Sideed ka dareemaysaa _____ ?